

## Sideen u dal badaa?

Haddaad jeclaan lahayd  
macluumaad dheeraad ah ama  
dalab, booqo [BloomingtonMN.gov](http://BloomingtonMN.gov),  
hal-ku-dheg: CEP II ama  
la xidhiidh


### Bloomington HRA

1800 W. Old Shakopee Road  
Bloomington MN 55431-3027

952-563-8937

TTY: 952-563-8740

### MEELAHA CEP II LOOGU TALOGALAY



*Si loo mutaysto maalgalinaha CEP II, guryuhu  
waa inay ku yaalaan meelaha loogu talogalay  
Bloomington, eeg khariiradda sare.*

*Maamulka Guryeynta iyo Dib-u-dhiska ee gudaha iyo  
Magaalada Bloomington (HRA) kuma takooro ku salaynta  
qoomiyad, midab, jinsi, waddanka qofku kasoo jeedo, da', ama  
naafo oggolaanshaha ama galaangal u yeelashada, ama ka  
daawaynta ama shaqaalaysiinta, adeegyadeeda, barnaami-  
yjada, ama hawlaha. Marka ay codsadaan, hooyga ayaa la siin si  
uu ugu saamaxo dadka naafada ah inay kaqaybqaataan dham-  
maan adeegyada, barnaamijyada ama hawlaha HRA. Marka  
la codsado, macluumaadkan waxa lagu  
heli karaa farta indhoolaha, far waawayn,  
maqal ama saxanka kombiyuutarka.*



## BARNAAMIJKA XOOJINTA BEESHA CEP II

*Dhisidda Bloomington ka Fiican*



**Barnaamijkan waa dadaalka iskaashi ee  
Magaalada Bloomington HRA, Degmada  
Hennepin iyo Waaxda Maraykanka ee Dib-  
u-dhiska Guryeynta iyo Magaalada.**

## WAA MAXAY CEP II?

### Barnaamijka Xoojinta Beesha

(CEP II) waxa loogu talagalay inuu kaalmeeyo mulkiilayaasha degganaha ah samaynta horumarinaha loo baahan yahay ee guryahooga. Guryaha mutaystay waa inay ku yaalaan meelaha loogu taloglaay Bloomington, eeg khariiradda dhabarka warqadda. Qiimaha guriga kadib horumarinaha sida uu go'aamiyo Qiimeeyaha Guri ee Magaaladu kama badnaan karo \$276,683.00

## LACAG INTEE LEEG AYAAN AMAAHAN KARAA WAANA MAXAY SHURUUDAHA DAYNTU

### Lacagta u badan daynta

Sida ay go'aamisay hra ilaa \$35,000

Daynta waxa la socon doona dulsaar sannadle ah oo boqolkiiba 4 ah muddo 10 sano ah dibna loo bixin mayo ilaa mulkiiluhu iibiyo, wareejiyo magaca ku qoran ama gurigu noqon waayo meesha uu sida rasmiga u deggan yahay amaahduhu.



## HORUMARINAHEE AYAA LA MUTAYSTAA?

### Horumarinaha la mutaystay waxa kamid ah:

- Dayactirrada baahiyaha caafimaad iyo badbaado.
- Dayactirrada calaamada koronto, kulaylin iyo biyo galin.
- Dajinta ranjiga lead\*
- Horumarinaha madhxinta tamarta.
- Horumarinaha dibadda sida dhinacyada, saqafka, majaroorada iyo tuumbadiisa, daaqaadaha, jidadka baabuurka, iyo seeska.



\*La rabaa dhammaan guryaha la dhisay kahor 1978.


## HORUMARINAHEE AYAAN LA MUTAYSAN

- Shaqada oo socoto ama dhammaaday kahor qaadashada daynta.
- Qalabka korontada ku shaqeeya ee kali istaaga.
- Xarumaha madadaalo sida barkadaha, mutulka, waasko qubayseed, dusha sare iyo daaradda.




## HOW DO I KNOW IF I QUALIFY?

Waxaad ka codsan kartaa la-talin HRA si aad u go'aamiso mutaysi daynta CEP II. La-talintu waa bilaa lacag mana jirto wax shuruud ah oo ku xidhan kaqaybqaadashada. Si aad u codsato la-talintan bilaa lacagta ah aayar I a xidhiidh HRA 952-563-8939.



Wixii macluumaad ah ama dalab, booqo [BloomingtonMN.gov](http://BloomingtonMN.gov)

## WAA MAXAY XADADKA DAKHLIGA DAYMAHA SI LOO HORUMARIYO GURIGA MULKIILUHU DEGGAN YAHAY



- Marka lagu saleeyo dakhliga dhammaan xubnaha qoyska iyo boqolkiiba 0.5 dhammaan hantida. Xadadka dakhligu waa isbeddeli karan.
- Dhammaan dadka deggan guriga, ooy kujiraan kiraystayaasha la xidhiidha iyo kuwa aan la xidhiidhin iyo dulsaarada.